Domocracy and Governance Policy Briefs

Federal Budget 2022 Analysis

August 2022

FALANQAYNTA MIISAANIYADDA SOOMAALIYA EE 2022: KALA DUWANAANSHIYAHA KHARASHAADKA IYO DAKHLIGA.

Soo koobid

Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ayaa fadhi wadajir ah ku ansixiyay miisaaniyad-sannadeedka 2022-ka bishii June 30, 2022. Sida uu dhigayo xeerka maamulka maaliyadda dowladda (2019), ansixinta miisaaniyaddan waxa ay ahayd in la meel-mariyo December 2021; waxaase hab-socodkii ragaadiyey doorashooyinkii dib u dhacay.

Miisaaniyadda Dowladda Federaalka Soomaaliya ee sanadka 2022-ka ayaa kor u kacday marka loo fiiriyo miisaaniyadda dhabta ah ee sanadkii hore 2021 oo ay ahayd $376.5 milyan, halka sanadkaan 2022 ay tahay $929.9 milyan. Intaa waxaa dheer, sanadkaan 2022, $250 milyan (26%) wadarta dakhliga waxaa lagu qiyaasay dakhli ururin gudaha halka $694.7 milyan (74%) ay noqon doonto taageero dibadeed.

Sidoo kale, Miisaaniyaddan ku-tiirsan deeq-bixiyeyaasha waxa ay muujinaysaa in dakhli ururinta gudaha aysan ku filnayn dawladda in ay maalgeliso kharashaadkeeda faraha badan ee 2022. Miisaaniyadda 2022-ka, kharashaadka waxaa loo qaybiyay afar hay'addood oo kala ah maamul (37.9%), adeegga bulshada (35%), gaashaandhigga iyo amniga (18.3%) iyo qaybta dhaqaalaha oo ah (9%). Miisaaniyad-sannadeedka dowladda federaalka Soomaaliya ayaa samaysay sare u kac balaaran tobankii sano ee la soo dhaafay, iyadoo ka ahayd $20 milyan sanadkii 2012, halka manta ay gaartay $929.9 milyan.

Si kastaba ha ahaatee, qoraalkan kooban waxa uu taxliilinayaa farqiga u dhexeeya miisaaniyad-maaliyeedka 2022-ka, marka laysi bar-bardhigo kharashaadka iyo dakhliga iyo in talooyin loo soo jeediyo dowladda si wax looga qabto dal-dalooladda la ogaaday muddada falanqaynta.

FALANQAYNTA MIISAANIYADDA SOOMAALIYA EE 2022: KALA DUWANAANSHIYAHA KHARASHAADKA IYO DAKHLIGA

Hordhac

Dhammaadkii xilliga KMG ah ee 2012-kii, dhismihii baarlamaan sharci ah iyo doorashadii ku xigtay ee dowladda cusub oo lagu dhisay dastuurka ku-meel-gaarka ah waxa ay ahayd tallaabo muhiim ah oo loo qaaday dhanka dowladda dhiska iyo miisaaniyadda guud ee Soomaaliya. Dastuurka cusub ayaa baarlamaanka siinaya awood uu ku ansixiyo miisaaniyadda dowladda. Bishii Disembar 2012, Soomaaliya waxa ay yeelatay miisaaniyad sanadeedkeed kii ugu horreeyay ee rasmi ah in ka badan labaatan sano. Wixii markaas ka dambeeyay, baarlamaanka federaalku wuxuu ansixiyaa qoondada kharashaadka iyo dakhliga ay hay'adda fulinta u soo jeediso sanad maaliyadeedka soo socda.



Wasaaradda Maaliyadda- Xeerka-Qoondadda Miisaaniyadda • Tobankii sano ee la soo dhaafay, Miisaaniyad-sannadeedka DFS ayaa si tartiib tartiib ah u korortay ilaa $910 milyan tan iyo 2012 (20 milyan 2012-kii Oktoobar-

Habraaca Miisaaniyadda Soomaaliya

Inkastoo dastuurka ku meel gaarka ah uu qeexayo mabaadi'da guud ee ansixinta miisaaniyadda ee baarlamaanka; si kastaba ha ahaatee, qaab-dhismeedka sharciga ee miisaaniyad-samaynta waxa ugu horayn lagu maamulaa Xeerka Maareynta Maaliyadda Dadweynaha (2019). Sannadka miisaaniyadeedku waxa uu soconayaa 1da Janaayo ilaa 31ka December.

Sannad kasta, Wasaaradda Maaliyadda waxa ay horgeysaa baarlamaanka federaalka warbixinta dakhliga iyo kharashaadka sanad maaliyadeedka soo socda si ay u eegaan, una ansixiyaan ka hor inta aysan noqon xeer sharci ah. Sida caadiga ah, miisaaniyadu waxa ay ka tarjumeysaa siyaasadaha iyo ujeedooyinka dawladda, go'aamadda ku saabsan sida loo qaadayo dakhliga, iyo sida loo isticmaalo kharashaadka si loo daboolo mudnaanta hor-tabinta leh ee dalka.

Xog kooban oo ku saabsan miisaaniyad-sannadeedka 2022

Baarlamaanka federaalka 10aad waqtigoodii wuxuu ku e kaa December 26, 2020, Soomaaliyana waxay gashay jahwareer siyaasadeed iyo ismariwaagii doorashadda dadban. Ismariwaaga doorashada ayaa soo jiitamayay muddo bilo ah, wuxuuna dalka ka abuuray faaruq baarlamaani ah.

Si kastaba ha ahaatee, maqnaanshaha baarlamaan sharci ah ayaa sababay in xukuumaddu aysan ansixin

miisaaniyada 2022-ka bishii December 2021. Xildhibaanada cusub ee baarlamaanka 11-aad ee federaalka ayaa la dhaariyay 14-kii Abriil sanadkaan, waxaana xigay qabashada doorshadda guddoonka laba Aqal ee baarlamaanka taas oo kala qabsoomtay 26 iyo 27 isla bisha Abriil.

Maadaama Baarlamaanka Federaalka uu awoodi waayey in uu meelmariyo Miisaaniyadda Qaranka ka hor bilowga sanad-maaliyadeedka 2022, xeerka maamulka maaliyadda guud (qodobka 22) wuxuu u oggolaaday xukuumadda inay hawlgeliso isticmaalka miisaaniyadda ku meel gaarka ah, rubaca ugu horeeya ee 2022 (Janaayo ilaa Maarso), si loo oggolaado sii wadida hawlaha dawladda. Miisaaniyadda ku meel gaarka ah ayaa lagu saleeyay rubuci ugu horeeya ee miisaaniyadii sanadkii hore (2021).

Iyadoo ay dhamaatay waqtiga ogolaanshaha miisaaniyadda ku meel gaarka ah iyo dib u dhac ku yimid dhameystirka doorashada baarlamaanka, xukuumadda xil-gaarsiinta ayaa bishii March, ansixisay qoondaynta miisaaniyad ku meel gaar ah oo dhan $206.5 milyan, rubuci labaad ee sanad maaliyadeedka 2022 si loo socodsiiyo howlaha dowladda iyadoo la filayo in baarlamaanka cusub ee federaalka uu meel marin doono miisaaniyad dhameystira xiliga dib ugu noqoshada miisaaniyadda. Waa markii labaad oo ay xukuumaddu hawl-geliso isticmaalka miisaaniyadda ku meel gaarka ah kadib December 2016, iyadoo sidaas si lamid ah uu baarlamaanka federaalka ku guul-darreystay inuu ansixiyo miisaaniyadda dowladda ee sannadka 2017-ka, kaddib markii uu dib u dhac ku yimid dhameystirka doorashada.

Xukuumadda xil-gaarsiinta ah ayaa bishii May, meel-marisay cadad lacageed oo dhan $918.7 milyan ee sanad-miisaaniyadeedka 2022. Wasiirka Maaliyadda, xukuumadda xil-gaarsiint Cabdiraxmaan Ducaale Beileh ayaa horgeeyay miisaaniyada 2022 kalfadhiga baarlamaanka federaalka ah (Golaha Shacabka iyo Aqalka Sare).

Baarlamaanka federaalka ayaa guddi isku dhaf ah oo ku meel gaar ah u saaray inay dib u eegis ku sameeyaan soo jeedinta miisaaniyada iyo inay warbixin u gudbiyaan kalfadhiga wadajirka ah. Kadib markii la soo gudbiyay warbixintii dib-u-eegista iyo lafa-gurka guddiga wadajirka ah ee kumeel gaarka ah, ayaa mudanayaasha baarlamaanka waxa ay su’aalo weeydiiyeen (oo inta badan khuseysay xiritaanka buugaagta xisaabaadka ee miisaaniyadihii hore), sii hayaha wasiirka maaliyadda, Cabdiraxmaan Ducaale Beileh, iyadoo su’aalo waydiintaan ay socotay saddex maalmood oo xiriir ah. 30-kii Juun, baarlamaanka federaalku wuxuu ansixiyay miisaaniyadda 2022.

Baarlamaanka ayaa markii dambe dhisay guddi ku meel gaar ah oo ka shaqeeya xiritaanka xisaabaadka miisaaniyad maaliyadeedka sanadihii hore ee la ansixiyay. Baarlamaanka

Federaalka ayaa ku guul darreystay inuu xiro warbixinnada xisaab-xirka 2018 ilaa 2021.

929.9 milyan oo doolar ayaa la qorsheeyay in la isticmaalo sanadka 2022-ka. Qorshayaashan miisaaniyadeed ayaa kor u kacay 568.3 milyan oo doolar (151%) marka loo eego kharashka dhabta ah ee sannadkii hore oo ahaa $376.5 milyan. Miisaaniyadda 2021-ka waxaa ku yimid hoos u dhac dhan $120 milyan marka loo fiiriyo kharashka dhabta ah ee sanadka 2020 oo ahaa $496.5 milyan. Miisaaniyada 2022 ee uu ansixiyay baarlamaanka federaalku waxaa lagu kordhiyay 11.2 milyan oo doolar, halka miisaaniyadda marki hore xukuumadda xil-gaarsiinta ah soo gudbisay ahayd 918.7 milyan oo doolar.

Si kastaba ha ahaatee, guddida isku dhafka ah ee dib-u-eegista ku samaysay miisaaniyada, ayaa warbixintooda ku xusay in wax ka bedel lagu sameeyay qaar ka mid ah madaxyada kharashaadka iyo sidoo kale lacag cusub oo lagu daray qeybta dakhliga kadib markii ay soo gudbisay laanta fulinta.

Warbixinta guddiga ayaa sidoo kale iftiimisay in isbeddelka qarashka cusub uu ka dhacay xafiiska madaxtooyada, dadaallada gurmadka abaaraha (oo sidoo kale hoos yimaada madaxtooyada) baarlamaanka, wasaaradda arrimaha diinta iyo awqaafta, Nabsugidda, Ciidanka Xooga Dalka, guddiga qandaraasyada, maxkamadda sare, xafiiska xeer ilaaliyaha guud, iyo sidoo kale qaar ka mid ah mashaariicda oo laga dhaafay kharashaadka agabka iyo adeegyada.

Heerka dakhliga ee miisaaniyad maaliyadeedka 2022

Miisaaniyaddu waxa ay ka kooban tahay laba qaybood oo kala ah dakhli iyo kharash. Si kastaba ha ahaatee, sanadka 2022, 250 milyan oo doolar (26%) wadarta guud ee dakhliga waxaa laga soo xarayn doonaa cashuuraha iyo dakhliyada aan cashuurta ahayn. Qiyaasta dakhliga gudaha ee 2022 ayaa kor u kacay 20.5 milyan doolar (9%) dakhligii dhabta ahaa ee sannadkii 2021 oo ahaa 229.5 milyan, in kasta oo markii hore la rajaynayay in la soo aruuriyo 260.1 milyan doolar oo dakhli gudaha ah.

Dowladda Federaalka ah ee Soomaaliya (DFS) waxa ay odorostay in miisaaniyad-sanadeedka 2022 ay heli doonto 694.7 milyan doolar oo dakhli dibadda ah, kaas oo kale imaanaya 209.2 milyan (22%) taageerada laba geesoodka ah, iyo 485.4 milyan doolar (51%) oo ah taageerada dhinacyada badan si loogu kabo dakhliga gudaha.

Tani waxa ay soo bandhigaysaa kobac dhan 547.7 milyan oo doolar (373%) marka loo eego kaalmo dibadeedka la helay sannadkii hore oo ahayd 146.9 milyan. DFS ayaa markii hore ku talagashay in ay hesho 411.7 milyan oo deeqda dibadda ah sanad-maaliyadeedka 2021 laakiin waa ay ku guuldareysatay in ay wada hesho.

Hoos u dhacan ayaa waxaa loo aaneynayaa ismari waagii siyaasadeed ee 2021-ka halkaas oo deeq-bixiyeyaal badan oo dibadda ah ay hakiyeen taageeradii miisaaniyadeed ee Soomaaliya sababo la xiriira khilaafka doorashada. Intaa waxaa dheer, sanadka 2022, dowladda Soomaaliya waxa ay filaysaa in ay daboosho (27%) oo kaliya kharashaadkeeda halka inta soo hartay (73%) lagu dabooli doono taageerada dibada ee laba geesoodka ah ama dhinacyada badan leh.



Source: Wasaaradda Maaliyadda-Xeerka-Qoondadda Miisaaniyadda • 2022, Dakhliga gudaha ee la filayo waa $250 milyan (26%) wadarta guud ee dakhliga halka deeqaha dibadda ay yihiin $694.7 milyan (74%).

Hal-ku-dhigga Miisaaniyadda 2022-ka ee “ku-tiirsanaanta dakhliga gudaha” iyo xaqiiqooyinka dhabta ah ee jira ayaa u muuqda kuwo kala duwan.

Sannad-maaliyadeedka 2022-ka waxa uu muujinayaa kala duwanaanshiyaha dakhliga iyada oo Soomaaliya ay filayso in ay hesho taageero badan oo deeq-bixiyeyaasha dibadda ah si ay ugu maal-galisoo hawlaha mudnaanta leh. Miisaaniyadda federaalku waxa ay gaartay tiradii ugu badnayd muddo toban sano ah; si kastaba ha ahaatee, waxa ay muujinaysaa kala duwanaanshiyaha dakhli-abuurista, iyadoo maalgelinta dibadda ay qaadatay saamiga ugu badan (74%), halka ururinta dakhliga gudaha samaynin wax horumar muuqda ah.

Dakhliga gudaha ee dowladda federaalka ayaa inta badan ka soo gala magaalada Muqdisho maadaama aysan jirin meel ka baxsan caasimadda oo ay dowladdu canshuur ka qaado.

Qoondadda qaybaha miisaaniyadda

Miisaaniyadda 2022-ka waxa ay u qoondaysay kharashaadka afar qaybood oo kala ah; maamulka, difaaca iyo amniga, dhaqaalaha iyo adeegga bulshada. 70 hay’adood (wasaarad, waax, wakaalado) oo hoos imaanaya afatraan qeybdood ayaa loo qaybiyay $929.9 milyan. Qaybta adeedga bulshadda waxa ay helaysaa qoondo weyn oo dhan $323.7 (35%). Lacag dhan $170.3 milyan (18.3%) ayaa sidoo kale loo qoondeeyay adeegyada difaaca iyo amniga halka $83 milyan (9%) ay ku baxayso kharashaadka qaybta dhaqaalaha. Qaybta ugu badan ee miisaaniyada oo dhan $352.7 milyan (37.9%) ayaa loo qorsheeyay kharashaadka waaxda maamulka.



Source: Wasaaradda Maaliyadda-Xeerka-Qoondadda Miisaaniyadda • Miisaaniyadda 2022-ka waxa ay u qoondaysay kharashaadka afar qaybood oo kala ah; maamulka, amniga, dhaqaalaha iyo adeegga bulshada.

Kharashaadka Qaybta Arrimaha Bulshada

Sanad-miisaaniyadeedka 2022-ka, 323.7 milyan oo doolar (oo u dhiganta 35% dhammaan miisaaniyadda) ayaa loo qoondeeyay wasaaradaha adeegga bulshadda. Wasaaradaha hoos yimaada qeybtan waxaa ka mid ah Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada, Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare, Wasaaradda Caafimaadka, Wasaaradda Haweenka iyo Horumarinta Xuquuqul Insaanka iyo Wasaaradda Dhallinyarada iyo Ciyaaraha.

Sannadka 2022, qoondada wasaaraddaha arrimaha bulshada waxa ay korortay 243.3 milyan oo doolar (302%), marka la bar-bardhigo qoondada dhabta ahayd ee 2021 oo dhameed 80.4 milyan doolar. 2017, qoondada dhammaan wasaaradaha adeeg bixinta bulshadda waxa ay ahayd $8.3 milyan (3.2%) ee miisaaniyada guud. Kharashaadka hay'adaha adeega bulshada wuxuu ahaa midka uu ku yimid kororka ugu weyn tan iyo miisaaniyada sanadeedkii 2018.

Sanadihii la soo dhaafay, Soomaaliya waxa ay heshay lacago loogu talagalay barnaamijyada adeeg bixinta bulshadda. Maalgelintan waxaa loo aaneynayaa kororka miisaaniyadda qaybta bulshada. Miisaaniyadda 2022-ka, 231.7 milyan oo doolar ayaa loo qoondeeyay Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada. Tani waxa ay ka dhigan tahay sare u kac dhan 191.1 milyan doolar, marka loo eego miisaaniyada dhabta ah ee 2021 oo ahayd 40.6 milyan doolar. In kasta oo kororkan weyn uu ka dhacay wasaaradda, haddana dhaqaalaha ugu badan, 229.9 milyan oo doolar ayaa lagu bixin doonaa barnaamijyada horumarinta bulshada halka lacag yar oo dhan 1.7 milyan loo qorsheeyay maamulka wasaaradda taasoo isugu jirta mushaar, gunno shaqaale, alaab iyo adeeg.

mashruuca Baxnaano oo ay Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada maamusho, waxaa lagu kharash-garayn doonaa 157.2 milyan doolar. Mashruuca Baxnaano oo uu maalgeliyay Bangiga Adduunka ayaa loogu talagalay in lagu siiyo lacag caddaan ah qoysaska saboolka ah iyo kuwa nugul.

Marka loo eego qorshaha dowladda federaalka ah, barnaamijka ayaa la filayaa in loogu gargaaro 200,000 oo qoys oo danyar ah iyo kuwa nugul oo ku nool degmooyinka qaar maamul goboleedyadda dalka.

Intaa waxaa dheer, shabakadda badbaadada ka hortaga Ayaxa ayaa waxaa loogu talagay $72 milyan si wax looga qabto dillaaca ayaxa iyadoo la siinayo lacag caddaan ah oo degdeg ah ku dhawaad 100,000 qoys oo sabool ah iyo kuwa nugul oo ku nool miyiga halka inta kale ay yihiin Mashaariicda Hay'adaha Qaramadda Midoobay ee wasaaradda la shaqeeya.

Sidoo kale, 58.5 milyan oo doolar ayaa loo qorsheeyay in ay ku baxdo Wasaaradda Caafimaadka sanad

maaliyadeedka 2022-ka. Si kastaba ha ahaatee, tani waxa ay muujinaysaa kobac ah 37.4 milyan doolar marka loo eego miisaaniyada dhabta ee 2021 oo ahayd $21.1 milyan. Lacagta ugu badan ($54.84 milyan) ee Wasaaradda Caafimaadka ayaa loo qaybiyay barnaamijyada adeegyada bixinta kuwaas oo ay ugu muhiimsan yihiin Damal Caafimaad, Talaalka COVID-19, mashruuca soo kabashada Qalalaasaha Soomaaliya iyo Maalgelinta Dib-u-habaynta Kharashka Soo noqnoqda (RCRF III), halka 3.66 milyan loo qoondeeyay kharashaadka maamulka la xiriira sida mushaharka shaqaalaha, gunnada, alaabta iyo adeegyada.



Source: Wasaaradda Maaliyadda-Xeerka-Qoondadda Miisaaniyadda • Miisaaniyadda 2022-ka, wasaaraddaha ac bulshadda ayaa loo qoondeeyay $323.7 milyan.

Intaa waxaa dheer, 30.1 milyan doolar ayaa loo qoondeeyay qeybta waxbarashada. Qoondadaan ayaa muujinaysa farqi dhan $12.8 milyan (74%) marka loo bar-bardhigo kharashaadka dhabta ah ee sannadkii hore oo ahaa $17.3 milyan. Si kastaba ha ahaatee, iyadoo kororkaas jiro, ayaa waxaa Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare loo qorsheeyay 20.5 milyan oo loogu talagalay in lagu maalgeliyo barnaamijyada waxbarashadda iyo bixinta adeegyada maamulka. Miisaaniyada inteeda kale waxaa loo qeybiyay Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed oo helaysa 7.2 milyan, Akadeemiyada Cilmiga iyo Fanka Soomaaliyeed 1.1 milyan, halka Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga loo qorsheeyay 1.4 milyan.

Sidoo kale, 2.3 milyan doolar ayaa qorsheeyay Wasaaradda Haweenka iyo Horumarinta Xuquuqul Insaanka. Tani waxa ay muujinaysaa kor u kac dhan 1.5 milyan marka loo eego maalgelinta dhabta ah ee 2021 oo ahayd $752,836.00. Wasaaradda waxa ay iskaashi la leedahay dhowr hay'adood oo Qaramada Midoobay ah (UNICEF, UNFPA, iyo UN Women) kuwaas oo maalgelin doona qaar ka mid ah mashaariicda horumarineed sannad-maaliyadeedka 2022.

Ugu dambayntii, Wasaaradda Dhallinyarada iyo Ciyaaraha ayaa miisaaniyadda 2022 ka heshay lacag ka yar hal milyan oo dollar ($909460). Tani waxa ay xitaa muujineysaa koror yar oo kabadan kharashka dhabta ah 2021 oo ahaae $752836 ($338,176.00 dheeraad ah 2022). Si kasta oo kharashka arrimaha bulshadu u kordhay, Wasaaradda Dhallinyarada iyo Ciyaaraha ma aysan soo jiidan qoondaynta miisaaniyadeed ee sii kordhaysa, oo ay heleen wasaaradaha kale ee bulshada sannadihii u dambeeyay.

Qoondaynta Difaaca iyo Amniga

Lacag dhan $170.3 milyan doolar, oo u dhiganta (18.3%) dhammaan kharashaadka maaliyadeed ee 2022, ayaa la qorsheeyay in lagu maalgeliyo hay'adaha difaaca iyo amniga. Qoondadaan ayaa muujinaysa koror dhan 10.4 milyan (7%) kharashka dhabta ah ee ku baxay sanadkii hore oo ah 159.9 milyan. Si kastaba ha ahaatee, 99.2 milyan ayaa loo qaybiyay Wasaaradda Gaashaandhigga ($1.2 milyan,) Ciidanka Xooga Dalka ($96.4 milyan), Maxkamadda Ciidamada Qalabka Sida ($1.4). milyan) iyo Hay'adda Agoonta iyo Naafada oo heshay ($115,000) halka dhanka kale $71.1 milyan loo qeybiyay Wasaaradda Amniga Gudaha ($1.5 milyan), Booliska Soomaaliya ($45.9 milyan) Nabadsugidda ($18.5 milyan), iyo sidoo kale Waaxda Socdaalka iyo Jinsiyadaha loo cayimay $5 milyan.

In kasta oo, Miisaaniyadda Difaaca iyo Amniga ay kor u kacday ilaa 2013, ayna tahay ku dhawaad shan meelood meel (1/5) dhammaan Miisaaniyadda Miisaaniyadda 2022, Dowladda Federaalka Soomaaliya ayaa weli ku tiirsan ATMIS (AMISOM) in ay ka caawiso amniga iyo ilaalinta madaxda dowladda iyo xarumaha muhiimka ah oo ay ka mid yihiin Villa Somalia, Garoonka Diyaaradaha Aadan Cadde iyo Dekedda Muqdisho. Marka laga eego dhinaca isla xisaabtanka, waxa maanka muwaadiniinta ku haray su'aasha ah intee le'eg tahay qiimaha lacagta lagu qarash gareynayo hay'adaha amniga iyo difaaca iyadoo qeybo badan oo dalka ka mid ah ay ka taliyaan Al-shabaab, iyo amni darrada ka jirto magaaladda muqidho 15-kii sano ee ugu dambeeyay.

Qaybta dhaqaalaha

Sannadkii 2022, 83 milyan doolar (9%) dhammaan miisaaniyadda sanadkaan ayaa loo qoondeeyay wasaaradaha dakhli soo saarka. Si kastaba ha ahaatee, waxaa jira kororsiimo dhan 44.3 milyan (115%) marka loo eego kharashka dhabta ah ee 2021 oo ahaa 38.6 milyan.

31.3 milyan oo doolar ayaa loo qoondeeyay wasaaradda howlaha guud iyo dib u dhiska iyadoo ay ku xigto wasaaradda gaadiidka oo ay ku jirto hay'adda duulista heshay 17.7 milyan. Wasaaradaha kale ee qaybtan waxa ay ka heli doonaan wax ka yar toban milyan qoondaynta 2022. Sidoo kale, $45 milyan (54%) oo ka mid ah qoondadda hay'adaha dhaqaalaha ayaa ku baxaysa adeega maamulka wasaaradaha halka inta soo hartay oo ah $37.9 milyan (46%) loo qoondeeyay mashaariicda horumarineed.

In kasta oo qoondooyinka miisaaniyadda ee dhammaan waaxaha, gaar ahaana qaybaha dhaqaalaha iyo bulshada, ay horumar sameeyeen sannadihii u dambeeyay, haddana waxaa gaabis ka jiraa aruurinta dakhliga gudaha marka la barbar dhigo kor u kaca taageerada deeq-bixiyayaasha dibadda. Si ay Soomaaliya u gaarto heerka deyn cafinta, waa in ay kordhisaa dakhliga gudaha si ay u awoodo in ay maalgeliso kharashaadka

joogtada ah iyo raasumaalka oo ay hadda qayb ahaan ay bixiyaan deeq-bixiyeyaal shisheeye. Jaantuska hoose ayaa faahfaahin doonta qoondada ay heshay wasaarad kasta.



Source: Wasaaradda Maaliyadda-Xeerka-qoondada Miisaaniyadda • Hay'adaha dhaqaalaha, laba wasaaradood ayaa qaatay qoondada ugu badan ($49) ee miisaaniyada 2022 halka wasaaradaha kale loo qaybiyay ($33.9) milyan.

Kharashaadka joogtada ah iyo raasamaalka ee miisaaniyada 2022

Inkastoo Miisaaniyadda Dowladda Federaalka ah ee Soomaaliya ay si tartiib tartiib ah u korortay sannadihii lasoo dhaafay, ayaa haddana waxaa xusid mudan in saamiga ugu badan ee Miisaaniyad-sannadeedka 2022-ka ay u badan tahay kharashaadka maamulka iyo adeega, iyadoo wax yar loo qoondeeyay adeegyada horumarinta bulshada. $929.9 milyan ee miisaaniyada sanadka ah, wadar dhan $696.4 milyan (tani waxa ku jira kharashaadka maamulka iyo kuwa adeega ee mashaariicda), oo u dhiganta (74%) waxa loo isticmaali doonaa kharashaadka joogtada, oo inta badan ah mushaharka shaqaalaha dawladda, gunnooyinka, iyo kharashaadka agabka iyo adeega; halka $233.4 milyan (25%) ee wadarta guud kharashaadka lagu bixin doono mashaariicda horumarinta.



Source: Wasaaradda Maaliyadda- Xeerka-Qoondadda Miisaaniyadda • Miisaaniyadda 2022, $696.4 milyan (tani waxa ku jira kharashaadka maamulka iyo kuwa adeega ee mashaariicda), waxa lagu kharash garayn doona kharashaadka joogtada halka $233.4 milyan ee wadarta guud kharashka lagu bixin doono mashaariicda horumarinta.

Intaa waxaa dheer, Dowladda Federaalka Soomaaliya (DFS) waxa ay ku bixin doontaa $423 milyan (45%) wadarta guud ee miisaaniyadda 2022 isticmaalka alaabo iyo adeegyo isku mid ah oo ku baxa dhammaan hay'adaha ku jira qoondadda miisaaniyadeed ee 2022. Adeegyadan waxaa ka mid ah kirada, agabka xafiisyada, shidaalka iyo saliida, dayactirka, safarada, kharashaadka shirarka, adeegyada waxbarashada, la-talinta iyo qaar kale.

Iyadoo kharashaadka joogtada ah ee DFS uu soo hagaagayay shantii sano ee ugu dambeysay, hadane, dowladda federaalka ma aysan qorin shaqaale rayid ah ilaa iyo 2016. DFS ayaa waxa ugu jira in yar lix kun (5783) oo shaqaale nidaamka mushaaraadka shaqaalaha rayidka ah.

Intaa waxaa dheer, haddii farqigaas uu ku sii jiro miisaaniyadda, awoodda DFS ee wax ka qabashada shaqo la'aanta iyo taageeridda soo kabashada muddada dheer; iyadoo horumarinta iyo hab-nololeedka dadweynaha ay sii yaraan doonaan. Si kastaba ha ahaatee, tani waxa ay tilmaamaysaa

baahida loo qabo in DFS ay xoojiso awoodda hay'adaha dowladda iyo soo saarista dakhli badan oo gudaha ah si kor loogu qaado bixinta adeegyada bulshada ee leh mudnaanta hor-tabinta.

Talo jeedin

Tan iyo 2013, Miisaaniyadda DFS ayaa si tartiib tartiib ah sare ugu kacday iyadoo ahayd 20 milyan doolar sanadkii 2012 halka sanadkaan 2022 ay tahay 929.9 milyan doolar. Intaa waxaa dheer, kobaca baaxadda leh ayaa mudan in la aqoonsado, iyadoo dowladda federaalku ay waddo horumarinta adeegyada bulshada iyo sidoo kale xooginta dakhliga gudaha.

Si kastaba ha ahaatee, waxaa xusid mudan in odoroska lagu dhisay miisaaniyad kororka ay ka tarjumayn waaqaca dhabta ah ee jira. Marka la is-barbar dhigo kororka balaaran ee miisaaniyada (dakhliga la filayo ee sanadihii la soo dhaafay) iyo tan dhabta ah ee la ururiyay, waxa ay muujinaysaa in tirooyinka kororku ay ku dhisan yihiin xaalado aan dhab ahayn.

Soomaaliya ayaa aruurisay $376.5 milyan oo dakhli ah oo ka mid ah $671 milyan ee la filaayay sanadka 2021, tani waxa ay si cad u caddaynaysaa in dhammaan odoroska miisaaniyaddu ay ku salaysan yihiin saadaal aan caqli gal ahayn.

Intaa waxaa dheer, dukumeentiga miisaaniyada 2022 wuxuu muujinayaa in dowladda federaalka ah ay gashay kharash dhan $459.8 milyan sanadki 2021, halka dakhliga dhabta ah ee soo xarooday uu gaaray $376.5 milyan; si kastaba ha ahaatee, tani waxa ay muujinaysaa in dawladdu ay amaahatay $83 milyan si ay u daboolaan kharashaadkaas.

Inkastoo Soomaaliya ay si xooggan uga go'an tahay dib u habeynta qaadista dakhliga gudaha, dadaallada is-waafajinta canshuuraha iyo horumarka joogtada ah ee ilaa hadda la gaaray; dakhliga gudaha ee dalka ayaa weli ah mid hooseeya.

Sidoo kale, Soomaaliya si ay awood ugu yeelato in ay maalgeliso raasamaalka dalka, sida kaabayaasha dhaqaalaha, iyo baahiyaha adeegyada bulshada, waa in dowladda federaalku dhistaa awoodda abaabulka dakhliga gudaha ee furdooyinka iyo maamullada Cashuuraha Berriga.

Ugu dambeyntii, dowladda federaalka waa in ay sameysaa hannaan maaliyadeed oo kala dhexeeya dowlad goboleedyada si la'isu waafajiyo nidaamka canshuuraha. Tani waxa ay si weyn u xoojin doontaa, sidii kor loogu qaadi lahaa ururinta dakhliga gudaha, maadaama tani ay tahay arrin muhiim u ah dalku inuu buuxiyo shuruudaha looga baahan yahay heerka dhammaystirka, ee hannaanka deyn cafinta dalalka deymaha legu lee yahay.

Ku saabsan Barsan Associates

Barsan Associates waa shirkad horumarineed oo ka hawlgasha Soomaaliya, xafiisna ku leh magaalada Nairobi. Barsan waxa ay siisaa adeegyo la-talin ballaaran iyo kaalmo farsamo macaamiisheeda maxalliga ah iyo kuwa caalamiga ah ee kala duwan oo ay ku jiraan NGO-yada, hay'adaha dawladda, hay'adaha deeqaha bixiyaasha iyo qaybaha gaarka loo leeyahay.

Wixii faah-faahin dheeri ah, fadlan kala xiriir ciwaankan, info@barsan.so ama booqo bogeena mareegta www.barsan.so.